
# Shidaalka Soomaaliya
## Masii Hurinayaa Colaadda?

**Dominik Balthasar**




The Heritage Institute For Policy Studies

Waxaa faafiyey Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda, 2014 Waddada Amira Hotel, KM5, Degmada Hodan, Muqdisho, Soomaaliya

**Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda**

Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda waa xarun cilmi baaris oo madax bannaan, dhexdhexaad ah, aan macaash doon aheyn oo fadhigeedu Muqdisho yahay.

**Ku saabsan qoraaga**

Dr. Dominik Balthasar waa khabiir xagga horumarinta ah oo ka tirsan Machadka Heritage. Wuxuu sidoo kale yahay khabiir xiriirka caalamiga ah iyo amniga u qaabilsan Chatham House, USIP iyo Machadka Yurub ee Daraasaadka Amniga. Si gaar ah Dr. Domonik wuxuu diiradda u saaraa arrimaha la xiriira dibu dhiska iyo horumarinta, gaar ahaan Soomaaliya. Wuxuu bare kasoo noqday LSE iyo SOAS oo London ku yaalla, wuxuuna talooyin siiyey hey'ado badan oo caalami ah iyo dalalka G7.

Rights: Copyright © Machadka Heritage ee Daraasaadka

Bogga hore: Kaalinta Shidaalka Somali Fuel Company 22 ee Muqdisho
Rights: Copyright © Machadka Heritage ee Daraasaadka

Qoraalka waxaa lagu faafiyey hannaanka Oggolaanshaha Creative Commons Ganacsi iyo macaash looma isticmaali karo www.creativecommons.org/licences/by/nc-nd/3.0.

Kala soo bax qoraalka bogga: www.heritageinstitute.org

# Tusmo


**Nuxurka Qoraalka** 1

**Arar** 2

**Shidaalka Gayiga Soomaaliyeed** 3

Xaalad uu Mugdi Ku Jiro 4

**'Balaayada Khayraadka'** 5

Dhibaatada Khayraadka u Geysto Dhaqaalaha 5

Dhibaatada Khayraadka u Geysto Siyaasadda 6

Xalka Muxuu Yahay? 6

**Soomaaliya Diyaar Ma u Tahay Batrool?** 7

Nugeylka Dhaqaaluhu ka Dhaxlo Khayraadka 7

Hanqal-taagga Dalalka Dariska ah 8

Soo Badashada Khilaafka Soomaalida Dhexdeeda 8

Kororka Xiisadaha iyo Amni Darrada 10

Culaysyada ka Jira Shuruucda Aan Caddayn 10

**Gunaanad iyo Talooyin** 11

**Tixraac** 13

**Biblography** 14

## Nuxurka Qoraalka

- Iyadoo ah furinta hore ee sahminta shidaalka Geeska Africa, Soomaaliya waa dal leh ifafaalo wanaagsan xagga tamarta, isla markaasna waa dal ay caqabado badan oo xagga sahanka shidaalka ah haystaan. Marka laga soo tago caqabado xagga farsamada, kaabayaasha iyo gaadiidka ah, Soomaaliya waxaa ku dahaaran culeysyo kale oo fara badan oo ay kamid yihiin siyaasad dheellineysa, hey'ado aad u nugul, ammaan darro iyo mugdi baahsan oo ku saabsan xuquuqda lahaanshaha hantida.

- Inkastoo xaaladda Soomaaliya ay caqabad weyn ku tahay shirkadaha qota shidaalka, haddana dowladda lafteeda ayay culeysyo ka haystaan sidii ay ula soo bixi laheyd khayraadka dhex ceegaaga dhulkeeda. Waxay u badan tahay in Soomaaliya ay la daalaa dhaci doonto dhibaatada la mataaneysan khayraadka dabiiciga ah. Dowladdu waxay ku khasbanaan doontaa inay la tacaasho caqabada badan oo la hubo inay kasoo ifbixi doonaan sahminta shidaalka iyo soo saarkiisaba, marka la eego sida curdanka ah ee ay Soomaaliya dib ugu dhiseyso qarankeedii.

- Khataraha ugu badan ee ay Soomaaliya waajaheyso waxaa kamid ah in sahminta shidaalku ay u badan tahay inay kiciso xiisad siyaasadeed isla markaana horseeddo dib usoo cusboonaanshaha colaadda. Arrinta shidaalku waxay u badan tahay inay keento in maamul-goboleedyadu ay dalbadaan hannaan federeraal ah oo baahsan kaas oo xuquuq iyo madax-bannaani badan siinaya gobollada, dalabkaas oo ah mid ay Dowladda Federaalku aad u diiddan tahay.

- Si dhib yar looma oddorosi karo in khayraadka tamarta uu Soomaaliya u noqon doono mid lagu naalloodo ama mid lagu khasaaro, waxayna taasi ku xiran tahay arrimo badan. Waxaase la hubaa in dhammaan dhinacyadu ay lagama maarmaan tahay inay aad u taxaddaraan, haddii la doonayo in khayraadku ay noqdaan kuwa hormariya dalka ee aan dhib u geysan.

## Arar

Shidaalka ayaa ah meel kamid ah saddex meelood baahida xagga tamarta ah ee dunida, waana hanti istiraatiiji ah marka la eego dhaqaalaha caalamka. (BP, 2012). Sanadihii ugu dambeeyey waxaa aad u kordhay baahida shidaalka loo qabo, waxaana la oddorasayaa in baahidaas ay sii xoogeysato. Waxaa sidoo kale sii kordhaya walaac laga qabo in shidaalku uu gabaabsi noqdo, waxaan taas keenay keydka oo sii yaraanaya, baahida dalalka warshadaha leh oo kordhaysa iyo tirada dadka dunida oo iyana kordheysa. Marka lagu daro cabsi xoog leh oo laga qabo ilaha sabbeynaya ee Bariga Dhexe iyo qiimaha oo circa isku shareeray gaaray-a $145 foostadii, waxay cabsiyadan is-biirsaday ku kallifeen shirkadihii shidaalka inay u ruuqaansadaan agaag cusub.

Aagaggaas waxaa kamid ah Bariga Africa, gobolkaas oo dhawaan helay khayraad badan. Sanadkii 2012, shirkadda Tullow ee fadhigeedu London yahay ayaa gobolka Turkana ee Waqooyi Bari Kenya ka heshay shidaal ganacsi gala. Shirkad kale oo iyana UK fadhigeedu yahay lana yiraahdo BG Group ayaa sheegtay inay Tanzania ka heshay gaas dabiici ah oo baaxad weyn. Marka lagu daro ceelal gaas oo laga helay xeebaha Mozambique, waxaa lagu qiyaasay tirada guud ee gaaskaas inay gaareyso 100 tirilyan oo dhudhun. Sidoo kale, Uganda waxaa laga helay kayd ballaaran, taas oo gobolka ku kordhisay waxa loo yaqaanno "tartanka dahabka madow" (eeg Shephard, 2013). Arrimahan ayaa sare u qaaday kaydka saliidda iyo gaaska in ka badan 100% iyo 70% labada qaybood. Sidaas darteed, waa cusub ayaa gobolka Geeska Africa u dillaacay, inkastoo ganacsiga shidaalku uu wali yahay mid heer gardaadin ah uu marayo.

Bariga Africa marka la eego, 10% ceelalka shidaal ee la qoday waxaa laga qoday Soomaaliya. (Abiikar, 2012). Inkastoo sahanka tamarta ee aaggan uu wali marayo heer aan sugneyn, haddana kaydka shidaalka dhex ceegaaga gayiga Soomaaliyeed waxaa lagu qiyaasaa 110 billion oo barmiil, taas oo la simeysa Kuwait (UPI, 2012). Sidoo kale, waxaa qiyaasayaa in xeebaha Soomaaliyana ay dhex ceegaagaan kayd aad u ballaaran gaas dabiici ah. Iyadoo ay ka go'an tahay inay si xowli ah ugu biirto tartan wax soo saarka tamarta ayay Dowladda Federaalka ah waxay sanadkii 2012 ku dhawaaqday inay xaraasheyso qaybo kamid ah 308 rug shidaal inta lagu jiro sanadka 2013. Hadalkaas durbadiiba waa loo guuxay, iyadoo ay jireen ifafaalo wanaagsan oo xagga amniga iyo xagga siyaasadda ah, taas oo yididiilo ku abuurta shirkadaha shidaalka.

Khayraadka tamarta Soomaaliya waxaa si gaar ah uga dhigaya kuwa aad loo daneynayo rajo laga qabo in macaash xoog leh laga sameeyo. Sidaas darteed, su'aal muhiim ah ayaa soo baxaysa oo ah: xasillooni siyaasadeed iyo mid amni ma ku baahi doonaa Soomaaliya muddada soke iyo mid dhexe, mise la kala caddeyn doonaa mugdiga xagga sharciga ah si loo fududeeyo wax soo saarka shidaalka? Waxaa iska cad in dhabbaha ay Soomaaliya haatan ku socoto aanuu ka marnaan doonin sahanka shidaalka, balse su'aasha la is weydiinayaa waxay tahay: intee in le'eg ayuu horumarka xagga tamarta ah culeys ku noqon doonaa dibu dhiska qaranka? Si qayaxan haddii loo dhigo, waxaa la isweydiinayaa in khayraadka tamartu ay sii holciyaan dhismaha qaranka iyo xasilinta.

Dhibaatadan waxay sii muuqaneysaa marka la eego sida ay Soomaaliya ugu baahan inay ka hortagto carqaladaha caadiga ah ee la mataaneysan khayraadka, waxaana lama huraan in Soomaaliya ay qiimeyso nugeylka hey'adaheeda. Intaas waxaa dheer, gayiga Soomaalida waxaa ka jira hannaan aad u nugul oo dib loogu qeexayo dibna loogu jeexayo soohdimaha dowladnimada. Maadaama ay u badan tahay in soohdimahan ay saameyn doonaan rajada laga qabo shidaal, daraasaddan waxay sahmineysaa sua'aasha ah sida ay rajooyinkaas halis u galin karaan mashruuca dibu dhiska qaranka.

Kaddib marka ay daraasaddu si kooban u milicsato khayraadka dhex ceegaaga dalka iyo sida uu ugu nugul yahay inuu ku dhoco bohosha khayraadka, daraasaddu waxay si qoto-dheer u gali doontaa caqabadaha gaarka ah ee ay u badan tahay inay Soomaaliya waajahdo. Marka sawir guud laga bixiyo caqabadaha ugu waaweyn kaddib, daraasaddu waxay sameyn doontaa gunaanad iyo talooyin tixgalin mudan.


## Shidaalka Gayiga Soomaaliyeed


Sooyaalka sahanka shidaalka Soomaaliya waa mid tobannaan sano soo jiray. Xilligii gumeystaha, dhul-baarayaal Talyaani iyo Ingiriis ah ayaa summadeeyey astaamaha shidaalka. Laga soo billaabo kontomeeyadii, shirkadda Talyaaniga ee Agip (oo hadda Eni la baxday) iyo midda Mareykanka ah ee Sinclai ayaa billaabay inay si cilmi ah u baaraan shidaalka Soomaaliya. Intaas waxaa xigay sahan ballaaran oo ay 80-meeyadii sameeyeen shirkadaha kala ah: ConocoPhillips, Shell (Pectin), Eni, Amoco, Total iyo Texaco. Balse riditaankii Max'ed Siyaad Barre iyo dagaalladii sokeeye ee ka dambeeya ayaa keenay in shirkadahaas iyo kuwa kale, sida BP iyo Cheveron ay hakad galiyaan howlohoodii. Waxaana sii raja tiray markii uu fashilmay howlgalkii ay Qaramada Midoobay hoggaamineysay ee 92/93-dii uu ku fashilmay inuu xasillooni siyaasadeed keeno.

Labaatameeyo sano kadidb, hadal-heynta shidaalka ayaa dib ugu soo laabatay saaxadda Soomaaliya. Sababta ugu muhiimsan ee ay shirkaduhu wali u xiiseynayaan Soomaaliya waa biseylka dhulka. Dhulka Soomaaliya wuxuu shaabbahaa kan Yemen, oo la hubiyey in kaydka ku jiraa uu 9 billion oo barmiil oo shidaal ah dhan yahay. Sida ay qabaan culimada ku takhasustay cilmiga baarista dhulka, ceelasha dalka Yemen ku yaalla ee la kala yiraahdo Marib-Shabwa iyo Sayun-Masila waxay xiriir la leeyihiin kuwa Nugaal iyo Dharoor ee waqooyiga Soomaaliya (eeg maabka 1 iyo 2).

Cilmi-baaris ay sameeyeen Bangiga Adduunka iyo Laanta Qaramaa Midoobay u qaabilsan Horumarinta ee UNDP, sanadkii 1991-dii ayaa lagu xaqiijiyey in dhulka Soomaaliya uu shidaal ku jiro. Daraasaddaas ayaa ogaatay in Soomaaliya ay leedahay mustaqbalka ugu wanaagsan ee shidaalka, marka eego dalalka ku teedsan Badda Cas iyo Khaliijka Cadan (Sudan oo kaliya ayaa ka horreysa).

Inkastoo filashada laga qabo shidaalka Soomaaliya aad u sarreyso, haddana wali si qoto-dheer looma sahmin dhulka. Sahankii la sameeyey wuxuu u badnaa waqooyiga Soomaaliya, sababo xagga amniga ah dartood. Gobolka goonida isu-taagay ee Somaliland, waxaa ka howl gala saddex shirkadood oo kala ah: Jacka Resources oo Australia laga leeyahay, Ophir Energy oo UK laga leeyahay iyo Genel oo ah shirkad Turkey iyo British isku jira. Shirkadda Ophir iyo midda Imaaraadka Carabta laga leeyahay ee Ras Al Khaimah Gas (RAK Gas) ayaa haatan ka qayb qaadanaya Heshiiska Wax Soo Saarka Berbera (Oil Investing News, 2012). Dowladda Somaliland ayaa 25-kii April 2013 ku dhawaaqday inay heshiis kale la gashay shirkadda Norway laga leeyahay ee DNO (Mallory, 2013).




Isha: http://www.hornpetroleum.com/Operations.html

Sidoo kale, Genel ayaa rukhsad sahmin shidaal la siiyey kaddib markii ay $40 million oo dollar u yaboohday Somaliland, lacagtaas oo ah mid aad weyn marka la eego miisaaniyadda Somaliland oo saddexdii sano ee lasoo dhaafay ka agdhaweyd $175 million sanadkii. Iyadoo ka duuleysa ballan-qaadkii

Madaxweyne Axmed Siilaanyo xilligii doorashada 2010-ka ee ahaa inuu dhammeystiri doono wajiga hore ee sahminta shidaalka inta uu jagada hayo, ayay shirkadda Genel waxay ku rajo weyneyd inay sanadkan 2014 ceelkii ugu horreeyey. Balse shirkadda ayaa hakisay howleheedii sababo xagga amniga ah dartood (Africa Confidential, 2013c). Dowladda Puntland, oo ah maamul-goboleed la sameeyey sanadkii 1998-dii, ayaa sanadkii 2005-tii saami weyn waxay shirkad Australia deggan oo la yiraahdo Range Resources ka siisay laba goobood oo waaweyn oo shidaalka laga baaro, iyadoo sidoo kale siiyey goobo kale oo badda ku dhex yaalla. Labo sano kaddib, shirkadda ayaa heshiis la galay Puntland lana wareegay 100% aagagga Nugaal iyo Dharoor, iyadoo isla markaana 80% usii gudbiyey shirkad Canada laga leeyahay oo la yiraahdo Canmex Minerals (oo hadda Africa Oil Corp la baxday). Sanadkii 2012-kii, Puntland waxay oggolaatay in sahankii ugu horreeyey la billaabo, iyadoo shirkadda Range Resources and midda Horn Petroleum (oo ay leedahay Africa Oil Corp) ay si wadajir ah qodis uga billaabeen aagga Dharoor. Si kasaba ha ahaatee, kaddib markii ay laba ceel oo sahan ah wax shidaal ama gaas ah soo saari waayeeyn, labadiiba waa la duugay.

Sidaas oo ay tahay, khubarada shidaalka ayaa rumeysan in aagagga Dharoor iyo Nugaal, oo baaxaddoodu ay kala tahay 14,384 km2 iyo 21,784 km2 inay dhex ceegaagaan shidaal ganacsi gala oo lagu qiyaasay 20 billion oo barmiil (Currie, 2012). Sidaas darteed ayay shirkadaha UK fadhigoodu yahay ee BP iyo Soma Oil waxay wada-xaajood kula jireen Dowladda Federaalka iyo maamul-goboleedyada, si ay u helaan xuquuqda sahminta shidaalka, iyagoo yaboohay inay mashaariic shaqo abuuris ah ka sameeyaan gobollada xeebaha Soomaaliya ku teedsan (Assl, 2012).

Xiisahan loo qabo shidaalka waxaa kaloo laga dheehan karaa dalalka dhaqaalohoodu soo kobcayo. Tusaale ahaan, shirkadda China National Offshore Oil Corporation (CNOOC), waxay ku guuleysatay inay oggolaansho sahmin shidaal ka hesho Dowladda KMG aheyd, xilligii Madaxweyne C/llahi Yusuf (Jopson, 2007). India ayaa sidoo kale xiiso muujisay, iyadoo soo jeedisay inay tababarto Ciidanka Xoogga Dalka, kordhiso ganacsiga labada dhinac isla markaana ay Soomaaliya kusoo dabbaasho shabakaddeeda Internet-ka si ay xoojiso tayada xagga tiknoolajiyada, iyadoo dooneysay inay howlahaas fursado shidaal ku beddeleto. (Assl, 2012; Africa Confidential, 2013c).

## Xaalad uu Mugdi Ku Jiro

Xaaladda siyaasadeed ee dalka ayaa waxaa soo waajahay kufaa kac badan sanadihii lasoo dhaafay. Colaado badan iyo maamullo kala duwan ayaa dalka soo maray. Waxaa kaloo sameysmay maamul-goboleedyo waaweyn. Somaliland and Puntland ayaa ugu waaweyn, balse waxaa jira kuwa kale, sida Galmudug, Ximan iyo Xeeb iyo Jubbaland. Waxaa jirta in maamulladaas qaarkood ay heshiisyo la saxiixdeen shirkado ajnabi ah, iyagoo aan oggolaansho ka heysan Dowladda Federaalka. Taas waxay horseedday xaalad mugdi galineysa waajibaadka qandaraasyada la kala saxiixday iyo cidda dhab ahaan iska leh xuquuqda khayraadka—arrintaasna dood ayaa wali ka taagan.

Tusaale mugdigaas astaan u ah aagga baaxaddiisu ay 12,000 km2 'SL 18', kaas oo ku yaalla Sool, oo ah gobol ay ku muransan yihiin Somaliland and Puntland. Somaliland waxay aaggaas heshiis kula gashay shirkadda Norway ee DNO bishii April 2013-kii, halka ay Puntland Dooxada Nugaal, oo ay ku jirto SL 18, ka iibisay shirkadda Horn Petroleum (Indian Ocean Newsletter, 2012). Intaas waxaa dheer in shirkadaha ConocoPhillips iyo Shell ay xuquuqda sahanka aaggaas ku haystaan heshiisyo ay saxiixeen 80-meeyadii. Iyadoo Somaliland, Puntland iyo Khaatumo oo 2012-kii la dhisay ay sheeganayaan aagagga aan soo sheegnay ayay Dowladda Federaalkuna ku doodeysaa inay iyadu leedahay awoodda sharciga ah ee bixinta rukhsooyinka sahminta shidaalka. Heshiis noocaas ayaa waxaa bishii February 2013 kala saxiixday PetroQuest Africa, oo taabacsan shirkadda Mareykanka ah ee Liberty Petroleum, iyo maamul-goboleedka Galmudug (Manson, 2013)

Culeysyada xagga sharciga ah ka sokow waxaa jira caqabado kale oo waajahaya wax soo saarka shidaalka. Kow, shidaalka Soomaaliya waa mid aad u adag in lala soo boxo, waxaana jira carqalado baahsan oo xagga kaabayaasha ah (waddooyin,

IWM) iyo xagga sifeynta. Sidaas darteed, waxaa lagama maarmaan ah in, inta aan shidaal lasoo saarin, marka hore maal-gashi xoog leh loo baahan yahay.

Labo, xaaladda amni waa mid aan sugneyn, inkastoo dhawaan laga itaal roonaaday kooxda al-Shabaab ee xiriirka la leh al-Qaacida. Dhowr toddobaad uun kaddib markii shirkado isbaheystay ay ku dhawaaqeen inay qoditaan billaabayaan horraantii 2012, ayay al-Shabaab ku hanjabtay in "shidaalka Soomaaliya uu wato geeri", iyo in heshiisyada waqooyiga Soomaaliya ay yihiin kuwa aan jirin (News Bank, 2012b)

Saddex, maqnaanshaha hey'adaha dowladda dhexe oo si qumaati ah u shaqeeya waxay ka dhigantaa in go'aanka siyaasadeed uu muddo ahaan doono mid aan la oddorosi karin, kuna xirnaan doono shakhsiyaad.

Shirkadaha shidaalka caalamig ah waxaa soo food saaray culeysyo waaweyn oo la xiriira sahminta iyo soo saarka shidaalka Soomaaliya. Sidoo kale, culeysyadaas oo kale ayaa heysta dowladda Soomaaliya iyo shacabkeeda. Waana kuwa u baahan in lala tacaalo si uu khayraadka Soomaaliya u noqdo barwaaqo ee aanuu balaayo u noqon. Caqabadaha ugu waaweyn ee jira waxa weeye waxa loo yaqaano "balaayada khayraadka".

## 'Balaayada Khayraadka'

Inkastoo aad looga faa'iideysan karo, haddana waxaa la wada ogsoon yahay in dhaqaalaha shidaalku aanuu dabiibi karin colaadda iyo horumar la'aanta. Waxaa jira dalal ku tanaaday khayraadkooda dabiiciga ah, sida Chile, Botswana iyo Indonesia. Balse waxaa jira kuwa aan sidaas uga faa'iideysan, sida Venezuela, Turkmenistan iyo Nigeria. Dakhliga guud ee Nigeria kasoo galay shidaal wuxuu kor u dhaafay $800 oo bilyan oo dollar 50-kii sano ee lasoo dhaafay, haddana dhaqaalaha qofka shakhsiga ah, dhexdhexaad ahaan kama gudbin $1 maalintii. Haddaba maxay tahay sababta ay halbeegyada horumarka dalalka sida Nigeria oo kale ah ay ula mid tahay kuwa aan wax khayraad ah laheyn? Intee in le'eg ayayse dhici kartaa in Soomaaliya ay dhabbahaas oo kale qaaddo?

### Dhibaatada Khayraadka u Geysto Dhaqaalaha

Aragtida ah in khayraadka dabiiciga ahi balaayo tahay (eeg Gelb, 1988; Auty, 1993), kaasoo loo yaqaanno 'wax badso wax beel ayay leedahay' (Karl, 1997), waxaa loola jeedaa kobcinta dhaqaalaha iyo hurumarka dalalka leh khayraadka dabiiciga ah aad ayuu uga liitaa kuwa aan lahayn. Daraasado badan oo u kuur galay dalalka dakhligoodu inta ugu badan ka yimaaddo khayraadkaas, halkii uu ka imaan lahaa canshuurta dadka laga qaado, waxaa dhacda in khayraadkaas dabiiciga ah uu ku lamaanan yahay in dhaqaaalha waddamadaasi dibu dhac ku yimaaddo (fiiri Auty, 2004; Humphreys, Sachs and Stiglitz, 2007; Beland and Tiagi, 2009). Aragtidani waxay u tiirineysaa dhibaatadan waxa loo yaqaano 'cudurka Dutch-ka) (Economist, 1977).

Sida caadiga ah, marka dakhli fara badan uu ka yimaaddo khayraadka dabiiciga ah, waxaa kaca qiimaha lacagt iyo sarrifkaba. Taasina waxay sababtaa in mushaarka shaqaaluhu kordho, kharashka wax soo saarkuna cirka isku shareero, natiijudu waxay noqotaa in tartankii wax soo saarku hoos u dhac ku yimaaddo, gaar ahaan wax soo saarka beeraha iyo kuwa warshadah intaba (fiiri Sachs iyo Warner, 2001; Gylfason, 2000; Bazilian et al., 2013). Maadaama dhaqaalaha Soomaaliya uu aad ugu xiran yahay dhoofinta xoolaha iyo khayraadka beeraha iyo sidoo kale ganacsiga, cudurka Dutch-ku wuxuu khatar ku yahay hurumarka dalka.

Muhiimadda ay leedahay in la fahmo dhibaatada ka timaadda khayraadka dabiiciga ma aha fara badnida khayraadkaas, ee waa kirada ka imaanaysa khayraadkaas, oo dhalinaysa jahawareer dhaqaale (Kolstad iyo Wiig, 2008). Haddii si kale loo fasiro, waxaa la dhihi karaa xitaa kirada ma aha waxa dhibka keenaya ee waa sida loo maareeyo ayaa keenta in khayraadkaas laga dhaxlo dhibaato. Taas waxaa loola jeeda (wax badso wax beel ayay leedahay) ma ah wax lagu qasban yahay, oo aan laga leexan karin, balse waa arrin laga hortagi karo iney dhacdo (fiiri sidoo kale Humphreys IWM, 2010; Roll iyo Sperling, 2011). Sidaas darteed, siyaasiyiintu waxay door weyn ka cayaaraan

sharxidda ama xallinta dhibaatada khayraadka dabiiciga ah. Waa su'aal u baahan in la isweydiiyo, in hoggaanka siyaasadda Soomaaliya leeyahay kartidii, hufnaantii iyo xirfaddii lagu maareyn lahaa ama looga hortagi lahaa caqabdahaas sababi kara xasarado dhaqaale.

## Dhibaatada Khayraadka u Geysto Siyaasadda

Haddaan ka gudubno khalkhalka dhaqaale ee khayraadka dabiiciga ah, waxaa la sheegay in khayraad ku sababi karo xiisado siyaasadeed oo cusub. Tusaale ahaan, waxaa lagu doodaa in khayraad fara badan oo dabiici ahi uu sababo in hoggaanka siyaasaddu ka madax banaanaado shacabka, taasina waxay keentaa in xiriirka siyaasiyiinta iyo shacabku yaraado iyo in siyaasiyiinta lala xisaabtami waayo. Taas waxaa sii dheer, dakhli fara badan oo aan ka iman shaqo wuxuu abuuraa in dabaqadda xukunka haysa ay uruursadaan hanti fara badan oo ay ku dhistaan ciidamada nabad-sugidda, ciidankaas oo loo isticmaalo in lagu xakameeyo mucaaradka iyo uu hirgalo nidaam siyaasi ah oo kaligii talis ah. Caqabadaha uga yimaada saliidda (oil) dalalka lagu manneystay khayraakaas ayaa waxaa kamid ah in xoogga la saaro rajada dimuquraadiyadda, gaar ahaan qoraallada laga qoro dhismaha qarannimo (eeg Karl, 1997; Chaudhry, 1997; Vandwelle, 1998).

Maadaama hay'adaha dowladda Soomaaliya ay tabar daran yihiin, oo aaney jirin xukun wadaag iyo awood qaybsi dheelli tiran iyo hannaan diqmoqraadiyadeed, dhaqaalaha ka imaanaaya shidaalka wuxuu dhaawici karaa siyaasadda. Haddi musuqmaasuqa faraha badan sii socdo, dhisitaanka hab loo xisaabiyo ama loo maareeyo khayraadka shidaalka ka yimaadda wuxuu abuuri karaa in uu caqabad ku noqdo hay'adaha dowladda Soomaaliya. La xisaabtan la'aanta dowladda iyaduna waxay sii kobcineysaa musuqmaasuq iyo khilaaf bulsho, taasoo fure u ah dagaallo cusub (fiiri Karl, 1998, 2000, 2005; De Soysa, 2000; Silberfein, 2004; Roll and Sperling, 2011; Ross, 2012).

## Xalka Muxuu Yahay?

Maadaama uu soo badanayo dareenka khatarta ku lammaanan ee khayraadka dabiiciga ah, xalka siyaasadeed oo looga hor tagi lahaa dhibaatada khayraadkaas-na aad ayaa looga doodaa. Qoraallada ka hadla dhibka khayraadka dabiiciga ah waxay muhiimadda siiyaan casharro dhowr oo laga bartay arrimahaas iyo inay bixiyaan tilmaamo sidii loo dhisi lahaa xal dhaqaale oo wax ku ool ah, iyo xukun leh asaas wanaagsan. Tallaabooyinkaas la qaadi karo waxaa kamid ah, in la xakameeyo kharshka dowladda, in ladhiso maaliyad looga hortagaayo khalkhal dhaqaale lana sameeyo sanduuq maal-gashi, iyo in la abuuro la xisaabtan shirkadaha soo saaraa khayraadkaas. Sidoo kale, daraasaduhu waxay tilmaamaan meelo badan oo xukuunka laga hagaajin karo, kuwaaso ay kamid yihiin in la dhiso tayada dowladda iyo in la xakameeyo musqmaasuqa.

Inkastoo casharro badan laga baran karo daraasado badan oo hore loo sameeyay oo lagu falanqeeyay arrimahan, wali waxaa jira dhibaatooyin dhowr ah oo ay leeyihiin xalalka lasoo jeediyay. Wali ma jiro xal guud oo looga hor tagi karo dhibaatada khayraadkaas, kaasoo ku xiran dal walba siyaasaddiisa, dhaqaalihiisa iyo arrimihiisa bulshada ee khaaska ah. Tan kale, xalka loo soo jeediyayna waxaa loogu talo galay meel leh siyaasad iyo sharci si fiican u shaqeeynaya (Carbonnier iyo Jerbi, 2013), taasina ma ah mid khuseysa dalalka aan ka hadleyno sida Soomaaliya. Sida ka jirta wadamada soo koraya, tabar darrida hay'adaha dowlada Soomaaliya waxey caqabad ku noqoneysaa in la abuuro lana dhaqan galiyo hab lagu maareeyo maaliyadda khayaadkaas ka imaanaaya.

Caqabadda saddexaad waxay tahay in, inkastoo ay lagama maarmaan tahay horumarinta dhaqaalaha iyo maareynta siyaasadda si looga hortago dhibka khayraadka, haddana meelaha lagu guuleeystay sida Botswana, Chile iyo Indonesia waxaay muujinayaan in aysan ku xirneyn khatarta siyaasiyiinta. Balse casharka laga bartay dalalkaas uu yahay in loo baahan yahay maamul iyo shaqaale leh xirfad iyo aqoon, si loo maareeyo dakhliga shidaalka, loona abuuro wax soosaar dhaqaale oo ka duwan kan batroolka, haddi la rabo inuu noqdo mid faa'iido u leh umadda, horumarna u horseeda (fiiri Shepherd, 2013).

## Soomaaliya Diyaar Ma u Tahay Batrool?

Laabatan sano iyo ka badan oo colaado iyo dhibaatoyin badan kaddib, waxay u muuqataa in Soomaaliya rajadeedu soo fiicnaaneyso. Ciidamada Midwoga Africa ee Soomaaliya (AMISOM) waxay sheegeen in ay gaareen guulo military, kadib dagaalladii ay la galeen ururka al-Shabaab, laga billaabo 2011, gaar ahaanna dagaalladii ay la galeen March 2014. Waxaa intaas sii dheer, 2012 waxaa hoos u dhacay weerarradii burcad badeedka Soomaaliya. Hurumarka laga gaaray dhinaca ammaanka waxaa ku lamaanan isbedel siyaadadeed. Dowladdii KMG ahayd ee soo jiitameysay 8 sano waxaa la soo gabagabeeyay 20 August 2012, markii la sameeyay baarlamaan iyo madaxweyne cusub.

Dhinaca arrimaha dibadda, Dowlada Federaalka Soomaaliya waxay xaqiijisay yoolalkeedii arrimiha dibadda, taasoo xoojisay kaalinteeda dibadda. Waxay aqoonsi ka heshay Marykanka iyo Hey'adda Lacagta Adduunka ee (IMF) bilihii January iyo April, iyo in Golaha Amaanka ee Qaramada Midoobay uu ka khafiifiyo cunaqabataynta hubka bishii March 2013. Laba bilood kaddibna, isla ururkaas wuxuu u codeeyay in la abuuro xafiis siyaasadeed oo cusub, oo loo yaqaanno the United Nations Assistance Mission in Somalia (UNSOM), iyo shirar caalami ah oo lagu qabtay London, Brussels, Yokohama, iyo Istanbul, kaasoo gogol xaar u noqday in xiriir cusub lala sameeyo Soomaaliya oo muddo dheer loo heystay inuu yahay waddan qarannimadiisi burburtay.

Si kastaba ha ahaatee, iyadoo ay jirto horumarkaas wanaagsan oo lagu tallaabsaday, Soomaaliya wali waxaa sugaaya jid dheer si ay uga baxdo tabar darrida dowladnimada. Sida ka muuqata weerarrada cusub ee argagixisada ah ee ka dhaca Muqdisho iyo dalalka dariska ah, waxay tilmaamayaan in aan al-Shabaab wali laga adkaan. Sidoo kale, waxaa in la isweydiiyo u baahan, in nabab la gaarayo mar haddii laga adkaado argagixisada, sida muuqata soo nooleynta iyo xoojinta gobollada waxaa ka dhalan kara iska hor imaad, dagaallo, qabyaaladduna waa macquul. Waxaa intaas dheer, muuqaalka siyaasadeed wali waxaa ku jira khalkhal, waana adagtahay in la saadaaliyo, taasna waxaa sabab u ah tabar darrida hay'adda dowladda iyo loollanka joogtada ah oo loogu jiro xukunka siyaasadda iyo kan hantida guud.

Iyadoo la fiirinayo caqabadahaas aan kor kusoo sheegnay, su'aaashu waa Soomaaliya diyaar ma u tahay shidaal? Haddi si kale loo dhigo, ma laga yaabaa in Soomaaliya ka badbaado 'balaayada khayraadka' dabiiciga ah? Maxay tahay caqabaadka ugu waaweyn ee k hor imaan kara markii ay ka gudubto dhibaayinkaas?

### Nugeylka Dhaqaaluhu ka Dhaxlo Khayraadka

In la abuuro wax soosaar dhaqaale oo xoogan waxa aasaas u ma ahan kaliya dhismaha qarannimada guud ahaan, balse wuxuu ka hortag u yahay khatarta dhaaqaale ee ka iman karta dhibaatada khayraadka. Daraasaadka ha hadla 'wax badso wax beel ayay leedahay' waxay tilmaamayaan in dalalka hodanka ku ah shidaalka ay abuuraan dhaqaale wax soosaar leh si ay u lahaadan dhaqaale isku dhafan iskuna dheelli tiran. Si loogu guuleeysto kan danbe, waxa sida badan lagu taliyaa in lacatga ka timaadda shidaalka la maal-galiyo laguna dhiso aqoota iyo wax soosaar kale (AfDB, 2008). Sida uu qabo xeerka Hartwick, dagganaansho dhaqaale waxaa la xaqiijin karaa haddi isticmaalka khayraadka dabiiciga ah lagu badalo kordhinta khayraadka ama hantida kale sida aqoonta, wax soo saarka kale (Hartwick, 1977). Maadaama dhaqaalaha ka yimaadda shidaalka kaliya uusan ku fileyn in Soomaalidoo dhan si joogto ah ugu noolaato nolol tayadeedu aad u sarreeyso, waxaa lagama maarmaan ah in la helo dhaqaale isku dhafan si loo abuuro ilo dhaqaale oo dakhli dhaliya, kana hortaga shaqo la'aanta iyo in dowladdu hesho miisaaniyad ku filan oo joogto ah. Miisaniyadda waxaa ciriiri galiya khalkhalka ku dhaca qiimaha khayraadka dabiiciga ah.

Deeq bixiyayaasha iyo dowladda Soomaaliya intaba waa inay xoogga saaraan in dhaqaalaha dhidibada loo aaso. Walina ma jiraan wax tallaabooyin ah oo dhinacaas loo qaaday. Dhaqaalaha Soomaaliya wali wuxuu ku xiran yahay dhoofinta xoolaha nool, mana laha wax soo saar warshadeed oo muuqda. Sidoo kale, shaqo la'aanta guud ahaan, gaar ahaan

shoqo la'aanta dhallinyarada aad ayey u badan tahay, taasi macnaheedu waa inay yar tahay isticmaalka tamarta iyo maskaxda shacabka. Inkastoo baahsanaanta isticmaalka korontadu ay shardi u tahay in la dhiso dhaqaale ku saleeysan wax soo saar noocyo badan leh, laakiin waxaa la dhihi karaa way adag tahay in Soomaaliya hiigsato yoolkaas xillayada dhow – sababtoo ah Soomaaliya awood uma laha inay xilliyadaan dhaw sameeysato warshad batroolka sifeeysa. Maadaama ay meesha ka maqan tahay owooddi lagu sifeyn lahaa batroolka, waxay hoos u dhigeysaa awooddii kobcin laheyd dhaqaalaha (Bazilian et al., 2013).

Soomaaliya malaha maamul leh xirfad iyo aqoon aad u sarreeysa oo ka badbaadin kara dalka dhibbatooyinka siyaasadeed iyo kan dhaqaale ee ka imaan kara soo saaridda batroolka (Shepherd, 2013). Waxaa intaas sii dheer, Soomaaliya wali ma laha sharci cad oo qeexaya xuquuqda hantida ma guuraanka ah, waxaa kaloo maqan awooddi lagu fulin lahaa sharuucdaas. Waxaana muuqata inaysan hay'adaha dowladdu awoodin inay xisaabtamaan, musqumaasuquna aad ayuu u baahsan yahay. Inkastoo aragtiyada laga qabo baahsanaanta musuqmaasuqa ay kala duwan yihiin, haddana Soomaaliya wali waxay kamid tahay wadamada ugu musqmaasuqa badan adduunka (Transparency International, 2012). Marka sababahaas aan soo xusnay oo dhan la eego, waxay u egtahay in Soomaaliya aysan awood u lahayn iney ka hor tagto dhiibaatooyinka lasoo darsi kara wax soo saarka batroolka. Intaas waxaa sii dheer waxaa jira caqabdo kale oo la xiriiri sidii loo qeexi lahaa ama loo dhisi lahaa dowladnimadi.

## Hanqal-taagga Dalalka Dariska ah

Horay ayaa loo xaqiijiyey in khayraadka dabiiciga ah ee uu dal hodon ku yahay, ay ka dhalan karto xiisad ka dhex aloosanta dalalka deriska lah (eeg Billon, 2004). Xaaladda Soomaaliyana waa sidaas, waayo dalalka deriska ah iyo kuwo durugsanba waxaa lagu eedeeyaa inay leeyihiin dano ka ballaaran arrimo siyaasadeed iyo kuwo bini'aadamnimo. Xeel-dheerayaal badan ayaa tilmaamay xiriirka ka dhexeeyey faragalintii caalamiga ahayd ee 1990-maadkii iyo danaha shirkadaha shidaalka ee Reer Galbeedka, hawl-gallada milateri ee maanta socdana waxaa marar badan laga aaminsan yahay inaysan qayb ahaan ka marnayn doonid la doonayo in batrool Soomaaliya laga baaro (tusaale ahaan eeg Gibbs 2000; Assl, 2012). Taana waxaaba si cad u muujinaya mid kamid ah shuruudihii lixda ahaa ee dowladda Maraykanku ku xirtay aqoonsiga dowladda Soomaaliya waxaa ka mid ahaa in dowladda Soomaaliya ay aqoonsato xuquuqihii shirkadaha shidaalka Maraykanka ee dalka ka baxay markii dowladdii Siyaad Barre ay bur-burtay (HIPS, 2013).

Sidoo kale, waxay u eg tahay in damac Kenya ka galay shidaalka Soomaaliya uu ahaa sababka ugu weyn ee ay faragelinta millateri ugu samaysay Soomaaliya ayna u garab istaagtay maamulkii hore ee loo samaynayey Jubbaland (Jopson, 2007). Qaabka ay Kenya uga furatay Kismaayo xafiiska xiriirka u qaabilsan, iyadoo aan fasax ka qaadan dowladda Soomaaliya, iyo sida ay shirkadda Eni ee Talyaaniga laga leeyahay 'si kas ah Kenya qandaraas ugula saxiixatay dhul-biyood ay caddahay in ay Soomaaliya leedahay,' ayaa ah arrimo xoojinaya dareenkaas. Inkastoo dowladda Soomaaliya aysan lahayn tabar ay uga tashato xoogagga caalamiga ah sida Kenya ee gacanta ka siinaya la dagaalanka al-Shabaab, waxay u eg tahay doonista ay Kenya doonayso in ay wakhtiga dhow baaritaan iyo qodid ka samayso Soomaaliya aysan sii murjinayn xaaladda oo kaliya balse ay carqalad ku noqon karto dib-u-soo-noolaynta qaran Soomaaliyeed oo xasilan, shaqaynayana.

## Soo Badashada Khilaafka Soomaalida Dhexdeeda

Arrinka shidaalku waxaa kale oo uu keeni karaa sii xoogaysiga khilaafka iyo xurgufaha siyaasadeed ee u dhexeeya maamullada Soomaalida. Waxayna arrintu sii xumaan kartaa xilliyadaan oo ay sii kordhayaan doonidda maamul goboleedyo. Markii uu socdey barnaamijkii lagu soo af-meerayey hannaankii ku-meel-gaarka ahaa iyo kaddibba doorashadii Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud ee September 2012-kii, waxaa soo shaac baxayey is-qabqabsiga maamullada hoose dhexdooda ka jiray iyo kii maamullada hoose iyo dowladda federaalka. Waxaa muuqata inay Puntland si weyn ugu qanacsan tahay in

Madaxweyne Xasan Sheekh uu gacan-bidixaynayo. Xeel-dheerayaashuna waxay tilmaameen in "Xiriirka Xamar ay la leedahay Punltnad uu aad uga fog yahay mid wanaagsan, uuna kasii xumaan karo haddii fursadaha qodidda shidaalku ay isa soo taraan," (Africa Confidential 2013a). Sidoo kale, kala shakiga Somaliland iyo Soomaaliya waa mid si weyn u muuqda sidiiba laga dareemayey murankii ku saabsanaa hawada Soomaaliya, shakina ma laha in arrintu sii murgi karto haddii shidaal beec gala laga helo Somaliland.

Sidoo kale, kala aragti-duwanaansho iyo khilaaf xooggan ayaa kasoo muuqanaya Koofurta iyo Bartamaha Soomaaliya. Doodaha hadda socda ee la xiriira qaabka iyo nooca uu noqonayo qaranka Soomaaliyeed, waxaa laga arkayaa dalab xooggan oo ah in la qaato hannaanka federaalka, kaasoo ka imaanaya Soomaalida iyo xoogag ka baxsanba. Inkastoo uu Madaxweynuhu muujiyey inuu ka gows haysto nidaamka federaalka – haddana culays Soomaali iyo ajnabiba ka yimid ayuu ka dhashay maamulka Jubbaland. Tan iyo habkii muranka watey ee Axmed Maxamed Islan 'Madobe' loogu doortay Madaxweynaha Jubbaland 15-kii May 2013, oo kaliya kama ay qarxin khilaaf weyn oo soo kala dhexgalay dowladda iyo dhinacyadii Jubbaland wadey, balse waxaa kale oo khilaafkaasi saameeyey dadka Jubbaland dhexdooda. Inkastoo is qabqabsiga Kismaayo ay keeni jireen arrimo badan, haddana loollanka ka dhacayey magaaladan dekedda ah waxaa soo kordhiyey dareen laga qabo oo tilmaamaya "in loollanku uu salka ku hayo khilaaf iyo damac la xiriira shidaal iyo gaaska dabiiciga ah" (United Press International, 2012b).

Maaddaama muranka ka imaanaya dareennada la xiriira saamaynta dowladda dhexe oo xooggan iyo baahinta xukunka oo xoogaystay, uuna gaaray heer khubarada qiimeeya Soomaaliya ay tilmaameen inay cabsi ka qabaan in wejiga soo socda ee dagaalka sokeeye ee Soomaaliya uu ka dhex qarxi karo dowladda dhexe iyo maamul goboleedyo gadoodsan (Africa Confidential, 2013b), iyada oo helidda shidaal iyo gaas dabiici ee dhawaantanna "ay istaraatijiyad ahaan heerka muranka meel sare gaarsiisay," (United Press International, 2012b). Quud-darrayn la quud-darraynayo in shidaal la helo waxay keentay tartan lagu tartamayo khayraadka, iyada oo dhinacyo siyaasaadeed ay bilaabeen in ay cad cad u goostaan ama u sheegtaan aagag shidaal lagu sheegay si ay kor ugu qaadaan awooddooda siyaasadeed iyo dhaqaale ee ay ku gorgortami karaan marka la bar-bar dhigo awoodaha dhinacyada ay is hayaan, sida ka muuqata heshiiska Galmudug iyo PetroQuest Africa ee Febraayo 2013.

Tanina waxay dhalinaysaa khatar aan la dhayalsan karin, maaddaama uu meesha ka maqan yahay hannaan qaran oo qaabaynaya sida loo qaybsanayo dakhliga ka soo baxa khayraadka dabiiciga ah. In kasta oo Dowladda Federaalka Soomaaliya ay ku kalsoon tahay in heshiis ku-meel-gaar ah ay waqti aan dheerayn la gaari karto maamulada Puntland iyo Jubbaland, haddana waxay u badan tahay in shuruucdii hagi lahayd heshiiskaas aanay meesha ool. Dhanka kale, Dastuurka Qabyada ah waxa uu qodobkiisa 44-aad si guud u tibaaxayaa "qaybsiga khayraadka dabiiciga ah ee Jamhuriyadda Federaalka ee Soomaaliya, waa in ay ka wada hadlaan heshiisna ka gaaraan dowladda Fedeaalka Soomaaliya iyo Dowladaha xubnaha ka ah federaalka si wafaqsan Dastuurkan", taas oo fursad weyn siinaysa in fasiraaddii la doono la saaro macnaha qodobka. Marka ay sheeganayso Dowladda Federaalka Soomaaliya in ay iyadu maamulayso khayraadka dalka waxa ay adeegsataa qodobka madaxbanaanida qaranka ee Dastuurka (Qodobka 7-aad, faqraddiisa 1-aad), madaxda maamulada (iyo kuwa dhismaya) ee maamul goboleedyadu waxa ay iyaguna xusaan in dastuurku si qayaxan u amrayo in dowladda dhexe iyo midda gobolladu ay ka wada xaajoodaan arrinta la xiriirta qaybsiga khayraadka dabiiciga ah. Weliba maamul goboleedyadu waxa ay xusaan in qodobka 54-aad ee dastuurka, marka uu kala dhig-dhigayo awoodaha dowladda federaalka iyo dowladaha xubnaha ka ah federaalka, aysan ku jirin khayraadka dabiiciga ah arrimaha sida goonida ah loogu xil-saaray Dowladda Federaalka.

Inkastoo dowlad goboleedyadu ay ka biyo diiddaan sheegashada ay Dowladda Federaalku sheeganayso khayraadka dabiiciga ah ee dalka, haddana muranka gobollada dhexdooda ah ayaa isna soo badanayey. Waxaa tusaale cad noqon kara, is-haysiga la isku haysto Jaanta Nugaal (Nugal Block)

kaas oo aan ku fidsanayn oo kaliya Somaliland iyo Puntland balse qayb ka ah maamulka Khaatumo oo dhawaan la sameeyey. Arrimahaas soo baxayaana waxa ay muujinayaan, haddii ay meesha ka maqan yihiin heshiis guud oo siyaasadeed iyo hannaan sharci, in ay u badan tahay - arrinta shidaalku - iska daadaa in ay horumarisee, in ay hor istaagi karto dib-u-yagleelidda dowlad xasilan oo Soomaaliyeed. Haddaba, waxaaba la oran karaa, waa arrin welwel laga qabi karo in colaad ay dhici karto, haddii tartan shidaal laga hormariyo taabba-gelinta is-afgarad siyaasadeed iyo hirgelin hannaan sharci oo u dhexeeeya Dowladda Federaalka iyo gobollada, kaas oo hagaya la soo bixidda iyo maaraynta khayraadka duugan ee dalka (eeg Jopson, 2007).

## Kororka Xiisadaha iyo Amni Darrada

Doonista la doonayo in shidaal la baaro lana soo saaro waxay kaloo qarxin kartaa iska dhac deegaannada dhexdooda ah, waxayna doc-wareen ku noqon kartaa doonista dowladda Soomaaliya iyo hirgelin nabad waarta iyo amni. Sida laga arkay Puntland-na, soo saaridda saliiddu, waxa ay sababi kartaa khaakhuul hoose. Ogosto 2005, Madaxweynihii hore ee Puntland Cadde Muuse waxa uu u duulay Dubai isaga oo kula kulmay wakiillo shirkadda Range Resources heshiisna la saxiixday, isagoo lagu eedeeyey inuusan u aabba-yeelin dastuurka Punltand iyo dhalashada Dowlad Federaal ah oo KMG. Isku dayo kale oo shirkadda Range Resources ay isku doontay inay macdan baarayaal ama jiyoolagiistayaal u dirto deegannadaas waxaa ka dhashay gadood deegaanka Majiyahan ee sideeda kale nabad ahayd. Bilihii March iyo April ee 2006, dadkii deegaanadaas waxay hubka u aruursadeen ciidamada Dowladda Puntland ee waardiyeynayey jiyoolojiistayaasha , isku dhacaas oo sababay in ay dhintaan toban ruux oo ay ku jiraan dadka deegaanka iyo askarba. Intaas kaddibna Puntland iyo Range Resource waa ay hakiyeen hawl-galkoodii maaddaama ay u caddaatay in beelaha Warsangeli ay dagaal ka xigaan in deegaankooda la isku ballaariyo iyaga oo aan ogolaansho bixin (eeg Newsbank, 2008).

Sababahaas awgeed ayaa keenay in la Puntland ay ka abuurmaan hay'ado cusub oo ammaanka qaabilsan. Shirkadda Africa Oil Corp tusaale ahaan waxaa hawlaheeda baaritaanka waardiya u ah shirkadaha amniga ee Salama Fikira oo Kenya laga leeyahay iyo Pathfinder oo South Africa ah. Hawlgallada shirkadahaas shidaalkuna waxay keentay abuuridda 2011 ciidan gaar ah oo Puntland u qaabilsan sugidda amniga midowga shirkadaha shidaalka ee Horn Petroleum-Canmex-Africa Oil Corp. Ciidaankaas oo laga soo dhex xulay ciidamada boliska iyo milateriga Punltland ayna tababareen Pathfinder, waxa ay ka kooban yihiin 300 oo ciidan hubaysan ah bil kastana mushaar ka qaata Canmex (eeg Indian Ocean Newsletter, 2012). Isbadellada noocan ahi ma ahan in ay sii kala furfurayaan oo kaliya ciidamada Soomaaliya, balse waxay sii adkaynayaan suuragalnimada in dowladda federaalku ay noqoto midda kaliya ee hanata awoodda ciidan ee dalka ama awood ku fulin karta siyaasadaheeda. Sidaas darteed Kooxda Kormeerka ee UN Monitoring Group waxay ku taliyeen 12kii July 2013-kii in "shirkadaha shidaalku ay joojiyaan la xaajoodka maamulada Soomaaliya ama ay ogaadaan in ay hurinayaan hab-maamul aan hufneyn iyo khilaaf siyaasadeed kaas oo uga sii dari kara colaadaha qabaa'ilka, noqonaya xadgudub nabadda iyo amniga," (eeg Africa Confidential 2013d).

## Culaysyada ka Jira Shuruucda Aan Caddayn

Waxaa sii kordhinaya suurtagalnimada in isku dhac yimaaddo, waa hubaal la'aanta iyo isku-haysiga la isku haysto cidda leh awoodda in shidaal la qodon karo iyo shirkadaha shidaalka baara oo heshiisyo iska hor imaanaya la kala saxiixday madaxda maamulada kala duwan oo Soomaaliya ka jira. Taasina waxay keenaysaa in shirkadaha shidaalku ay ku dadaalaan in ay sii culaysiyaan dhinacyada ay heshiiska la galeen si loogu hirgeliyo wixii laga ballan qaaday ayna xuquuqdooda u helaan, taas oo culays ku sii kordhinaysa xaaladaha cakiran ee ka dhex jiraha beelaha / deegaanada.

Tusaale ahaan Febraayo 2013, PetroQuest Africa waxa ay heshiis shidaal baaris la saxiixday maamulka Galmudug, oo ka dhisan koofurta Puntland. Ruqsada ay Galmudug bixisay waxa ay ku saabsan tahay cad dhul ah oo shirkadda Shell ay ku doodayso in ay horay ruqsad ugu haysatey,

Shell-na waxa ay ku dalbatay warqad ku taariikhaysan 24 April 2013 in dowladda federaalka ahi ay jaantaas dhulka ah (block) ee ay iyadu horay ruqsada ugu haysatey loogu ilaaliyo, taasina waxa ay keeni kartaa in arrintu isku badesho gacan ka hadal. (eeg Manson 2013).

Dhanka kale, uma eka in sharciyada Soomaalidu isticmaalayso oo iska horimaanaya uu caawinayo in ay wax kala caddaadaan. Tusaale ahaan, shirciga dalka ee ee shidaalka ee 2008 la sameeyey waa mid aan aad waadax u ahayn, fasiraado badanna la siin karo, in kasta oo dowladdu ay tilmaanto in uu yahay sharci aad u horreeya. Weliba, su'aasha weyn ee ah kuwa ay yihiin madaxda siyaasadeed ee loo ogol yahay in ay saxiixaan heshiis lagu soo saarayo saliidda Soomaaliya weli ma cadda. In kasta oo Madaxweynihii ku meel gaarka ahaa ee hore ee Cabdullaahi Yuusuf Axmed uu si rasmi ah ugu ogolaaday in maamul goboleedyadu ay awooddaan ay heshiis soo saarid shidaal geli karaan (Newsbank 2012a), haddana Cabdullaahi Xaydar, la taliyihii sare ee Madaxweyne Sheekh Shariif Sheekh Axmed, waxa uu shaaca ka qaaday October 2012 in dhammaan heshiisyada shidaalka ee ay saxiixeen maamulada gobolada ay yihiin wax kama jiraan. Isla markaas madax kale oo dowladda ka tirsan ayaa sheegay taas cagsigeeda (eeg Gilblom 2012). Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud asagu dhankiisa, aad ayuu uga hor yimid in maamulada goboladu saxiixaan heshiisyo shidaal, isaga oo welwel ka muujiyey in xuquuqo shidaal baaris oo ay hal goob ku wada sheeganayaan shirkado kala duwan in ay Soomaaliya u rogi karaan gole uu camimay jaah-wareer siyaasadeed. Waxaa kale oo uu ugu baaqay shirkadaha caalamiga ah ee saliidda baara in aysan heshiisyo la galin maamulada gobolada, isaga oo ugu goodiyey in haddii ay taas sameyaan ay "ka hor-istaagi doonto in ay mustaqbalka ka hawl galaan Soomaaliya," (eeg Manson 2013).

## Gunaanad iyo Talooyin

Inkastoo la tilmaamay in helidda shidaal ay keeni karto, in xal loo helo dhibaatooyinka bulsho, siyaasadeed iyo dhaqaale ee Soomaaliya (assl, 2012), haddana waa lagama maarmaan in la taxaddaro. Sida "saliiddu ay u sii shidday loolanka xukun doonka iyo dakhli-doonidda ayna u daahisay - haddaysanba kala daadin - dib-u-dhiska qaranka Ciraaq", ayay Soomaaliyana ula kulmi kartaa xaalad tan Ciraaq la mid ah (Larbi, 2012). Khatartuna waxay ka imaanaysaa nuglaanta ay Soomaaliya u nugushahay inay ku hafato nicmada sida degdegga ah loo helo iyo curdannimada barnaamijka dibu dhiska qaran Soomaaliyeed. Marka la eego xaaladda guud ee Soomaaliya ku sugan tahayna, waxay u egtahay, baaridda iyo qodista Soomaaliya shidaal laga soo saaraa inay u badan tahay inay sii murjiso xaaladda hadda murugsan ee lagu dhibban yahay sidii loo unki lahaa madax-siyaasadeed oo is oggol iyo sal u dhigidda hay'ado maamul oo hufan, la iskuna hallayn karo oo horay u wada dadaallada lagu hirgelinayo qaran Soomaaliyeed. In shidaalka Soomaaliya loo maamulo hab hufan, cadaalad ah faa'iidana leh, waa howl ay culays kala kulmayaan madaxda Soomaaliyeed. Weliba, maqnaanta hay'ado qaran oo awooddoodu kaamil u tahay iyo maqnaanta is-kor-meeris iyo isla xisaabtan waxay sii xoojinaysaa in lagu dhaqmo musuq-maasuq ayna dheeraato dhumucda khilaafka bulshada, kuwaas oo la oran karo waa kiciyayaal waweyn (drivers) ee carqalad ama soo cusboonaanta carqaladaha.

Carqalad kale oo weyn oo kahor imaan karta in si faa'iido leh looga hawl galo qodidda iyo ka-faa'iideysiga khayraadka shidaalka waxa ay la xiriirtaa sida la isugu xijinayo ama loo kala hormarinayo soo saaridda saliidda iyo horumarka siyaasadeed. Khatar weyn ayaa ku jirta haddii, si deg deg ah loo guda galo soo saaridda saliidda - oo laga hormariyo hirglinta is-afgarad siyaasdeed ee dowlad goboleedyada iyo dowladda federaalka - in ay taasi keeni karto carqalad iyo isku dhac.

Haddaba, maaraynta khataraha la xiriira soo saaridda saliidda Soomaaliya, xal uma noqon karto oo kaliya in lasoo jeediyo in laga taxadaro carqaladaha ka dhasha xaaladaha 'balaayada khayraadka' loo yaqaan oo ah in markii uu waddan si deg deg ah u noqdo hodan, in dhaqaala dalkaas uu ku yimaado dhantaalnaan dhaawac wata. Haddaba, su'aashu waxay noqonaysaa, si xal loogu helo culaysyada ku mataanaysan soo saaridda saliidda Soomaaliya, maxay yihiin soo jeedimaha ama talooyinka siyaasadeed ee dhinacyada ay

taladu ka go'do ay u baahan yihiin in ay maanka ku hayaan?

Ugu horrayn, waxa la gudboon dowladda federaalka sida ugu dhaqsaha badan inay xal u hesho mugdiga xagga sharciyadda la xiriira iyo xalinta meelaha siyaasad ahaan uu khilaafku ka jiro. Taas macnaheedu waxa ay tahay baarlamaanka Soomaaliyeed oo ay weheliyaan wakiillo kalsoonida shacabka haysta oo gobollada ka socda, inay dib u habayn ku sameeyaan sharciyada dalka ee maamula soo bixinta khayraadka dabiiciga ah. Waan in la qabyo tiraa arrimaha aan sharciga ku caddayn ama kuwa aan micnahoodu caddayn ee dastuurka ah. Sidoo kale, xukuumaddu waa in ay heshaa xal siyaaasadeed oo lagu midaysan yahay kama danbaysna ah oo la xiriira su'aasha ah: horta yaa xaq u leh in ay shirkadaha shidaalka la galaan heshiis yaana laga rabaa inay heshiisyadaas fuliyaan. Arrintani ma aha mid fudud, waxaana wada shaqayn laga rabaa maamul goboleedyada Soomaaliya ka jira iyo kuwa curanaya. Waana in Soomaaliya ay u kuur gashaa sida ugu wanaagsan ee ay ku heli karto kuna hanan karto, farsamo iyo aqoon maamul oo sahlaya in hannaan xeel dheer lagula gor-gortamo shirkadaha shidaalka laguna maamulo heshiisyada lala galayo shirkadaha caalamiga ah.

Intaas ka horna waxaa xal noqon kara, abuurista sanduuq lagu ururiyo dhammaan dakhliga kasoo gala batroolka Soomaaliya laga soo saaro. Madaxda siyaasadda oo dalka oo dhan ayaa isku waafaqi kara sharci amraya in lacagtaas aan la isticmaalin illaa inta laga dejinayo sharciyo kaamil ah oo tilmaamaya sida dowladaha kala duwan ay u wadaagayaan dakhliga laga helo khayraadka dabiiciga ah. Habkani ma aha oo kaliya xalka ugu mudan ee Soomaaliya qaadan karto si looga badbaado dagaal sokeeye, balse waxaa uu noqon karaa oo kale, mid dadajiya hannaan lagu gaari karo xal siyaasadeed iyo mid sharci, si loogu gunda dego ka faa'iideysiga fursadaha shidaal ee Soomaaliya. Qorshaha Shidaal ee Dowladda Federaalku waxa uu u qaabaysan yahay sidii talaabooyin deg deg ah loogu qaadi lahaa dhanka baaridda iyo qodidda shidaalka, laakiin, waxaa haboon in mar ka hore la xaliyo mugdiga iyo caddaan la'aanta ka jirta dhinacyada sharciga, siyaasadda iyo dastuurka, si loo yareeyo khatarta ka imaan karta la soo bixidda shidaalka.

Midda labaad, madaxda Soomaalidu waxaa la gudboon inay u hawl-galaan dejinta hannaan ku wajahan sidii lagu maarayn lahaa damaca shacabka ee ku wajahan soo bixinta khayraadka dabiiciga ah. Sida ay sameeyeen dalal kale, sida Tanzania, waa lagama maarmaan maaraynta damaca dadweynaha si looga hortago waxyaabaha ka dhalan kara niyad jab shacab hankoodu kacay kaddibna hungoobey. Dadweynaha damaca geli kara waa in aan niyad-jebin lagala hortagin, balse waa in si furcad oo xaqiiqada lala wadaagayo xogta jirta ay u helaan. Guddi Qaran oo maamulada oo dhan ay ka kooban yihiin oo qaabilsan khayraadka dabiiciga ah ayaa ka hawl geli kara maaraynta arrintaas. Guddigaan waxa uu noqon karaa, meel laga helo aqoonta la xiriirta arrimaha ku saabsan soo saaridda saliidda, isaga oo soo gudbinaya khibradaha dalalka kale ee shidaalka soo saara ee federaalka ah; guddigaani, waxaa kale oo uu noqon karaa madal ka shaqaysa wadashaqaynta heerarka kala duwan ee maamulka dowliga ah, kalana taliya sidii horay loogu socon lahaa.

Saddex, shirkadaha caalamiga ahee shidaalka soo saara waxay u baahan yihiin inay qaataan taxaddar dheeri ah si aysan u carqaladayn guulaha kooban ee muddooyinkii dhawaa laga gaaray dib-u-dhiska qaran Soomaaliyeed. Taa micnaheedu waa in shirkadahaasi si leex-leexad la'aan ay ugu dhaqmaan shuruucda Soomaaliya. Sidoo kale, shirkadaha shidaalku intii ay ku mashquuli lahaayeen oo kaliya khayraadka dabiiciga ah, waa inay talada ku darsadaan in si guud ay uga qayb qaataan horumarinta iyo ka faa'iideysiga khayraadka saliidda Soomaaliya. Waxayna ku billaabi karaan, inay gacan ku siiyaan in maamulada Soomaaliyeed inay u hawl-galaan maaraynta damaca shacabka iyo in Soomaaliya laga hirgeliyo hay'ado ku haboon lehna farsamo iyo aqoon maamul. Waxaa kale oo taa la xiriira, in shirkadaha caalamia ahi ay sugaan taabba galka is-faham siyaasadeed iyo diyaarin sharci ee maamulada Soomaalida, inta aysan u qalab qaadan baaridda iyo soo saarka saliidda Soomaaliya. Ku deg degidda qodaalka shidaalku, waxa uu dowladda ka hor-istaagayaa hirgelinta hay'adaha

lafdhabarta ah, waxa uuna ka dhigayaa mid ku mashquusha faa'iido dhaqaale oo yar oo xilli kooban ah, intii loo hawl geli lahaa faa'iido baaxad leh oo waari karta.

Tan afraad, deeq bixiyayaasha caalamku, waa inay ugu yaraan ugu baaqaan shirkadaha Soomaaliya batroolka ka qodaya inay u dhaqmaan hab hufanaan leh. Sidoo kale, ururrada samafalka ee caalamiga ah waa inay hawl-galada shirkadaha gaaarka loo leeyahay ku darsadaan qorshahooda horumarineed, si isbahaysi wax ku ool ah iyo midayn shaqo oo tayo leh loo helo. Weliba, deeq bixiyayaasha iyo maal geliyayaasha caalamiga ahi, waa in ay ka fakaraan in ay maal galiyaan hirgeinta awood wax soo saar, iyaga oo ka bilaabi kara dib-u-dhiska kaabayaasha tamarta ee hadda curyaanka ah, ugu danbayna, waa in ay qorshaha ku darsadaan in ay deeqahooda ku bixiyaan hab lagu xasilin karo sabbaynta miisaaniyadaha dowladda oo la hubo in aysan sal-dhigi doonin haddii Soomaaliya noqoto dal ku tiirsan dakhliga saliidda.

Dariiqa Soomaaliya u marayso la soo bixidda shidaalku waa mid qalqallooc badan, caqabadana ay ka buuxaan. Nugeylka xaaladda siyaasadeed ee Soomaaliya, tabar la'aanta hay'adaha dalka iyo curdan-nimada shuruucda ayaa shaki gelinaya in Soomaaliya ay si dhab ah ugu diyaarsan tahay in ay u babac dhigto culaysyada lamaanaha la ah qodashada shidaalka. Si aan dabka baasiin loogu sii shubin, isla markaana si sida ugu habboon looga faa'iideysto fursadda la soo bixidda saliida Soomaaliya, taxadar ballaaran ayaa looga baahan yahay dhammaan dhinacyada arrintaan ku lugta leh. Sida kaliya ee khayraadka shidaal ee Soomaaliya uu noqon karaa mid aan lagu hungoobin balse haakah la yiraahdo, laguna gaaro horumarka Soomaali hiigsanayso, waa in loo arkaa shidaalka aalad lagu dhisayo qaran mug iyo macno leh, waana in aan shidaalka loo arag yoolka ugu danbeeya ee la hiigsanayo.

## Tixraac

[1] Baahida shidaal ee caalamka ayaa sanadkii 2000 gaareysay 75 milyan oo barmiil maalin walba. Hey'adda Tamarta Dunida ayaa sheegtay in sanadka 2030-ka, baahidaas ay laba jibaarmi doonto (Anderson & Browne).

[2] Barbar dhig ahaan, ku dhawaad 14,000 oo ceel ayaa la duugay Galbeedka Africa, halka 20,000 la duugay Waqooyiga Africa (Anderson and Browne, 2011).

[3] Waraysi Masuul Sare oo ka tirsan dowladda Soomaaliya 22 May 2014.

[4] Eeg, tusaale ahaa, War-murtiyeedkii ka soo baxay shirkii London ee Soomaaliya.

[5] Waraysi Masuul Sare oo ka tirsan dowladda Soomaaliya 22 May 2014.

## Bibliography

Abiikar, A. (2012) 'Somalia's Oil and Gas Potential'; URL: http://www.hiiraan.com/op4/2012/dec/27479/somalia_s_oil_and_gas_potential.aspx, accessed 28 April 2014.

Africa Confidential (2013a) 'Northern parts', 11 January.

Africa Confidential (2013b) 'The statelets of the nation', 24 January.

Africa Confidential (2013c) 'The Puntland problem', 1 February.

Africa Confidential (2013d) 'Oil bids defy security crisis', 4 October.

African Development Bank (2008) *Managing Oil Revenue in Uganda: A Policy Note*, OREA Knowledge Series. AfDB: Addis Ababa.

Anderson, D. and Browne, A. (2011) 'The politics of oil in Eastern Africa', *Journal of Eastern African Studies*, vol. 5, no. 2.

Assl, N. K. (2012) 'Oil can be a boon for Somalia', Gulf News, 30 April.

Auty, R. M. (1993) *Sustaining Development in Mineral Economies: The Resource Curse Thesis.* Routledge: London.

Auty, R. M. (2004) 'Natural Resources and Civil Strife: A Two-Stage Process', *Geopolitics*, vol. 9, no. 1.

Bazilian, M., Onyeji, I., Aqrawi, P-K., Savacool, B., Ofori, E., Kammen, D., and Van de Graaf, T. (2013) 'Oil, Energy Poverty and Resource Dependence in West Africa', *Journal of Energy and Natural Resources Law*, vol. 31, no. 1.

Beland, L-P. and Tiagi, R. (2009) *Economic Freedom and the Resource Curse: An Empirical Analysis.* Fraser Institute: Toronto.

Billon, P. (2004) 'Geopolitical Economy of Resource Wars', *Geopolitics*, vol. 9, no. 1.

BP (2012) *BP Statistical Review of World Energy, June 2012.* BP: London.

Carbonnier, G. and Jerbi, S. (2013) *Addressing Governance in 'Fragile States': A Role for Extractive Industries?* CCDP Issue Brief, January. The Graduate Institute: Geneva.

Chaudhry, K. A. (1997) *The Price of Wealth: Economies and Institutions in the Middle East.* Cornell University Press: Ithaca.

Currie, (2012) 'High Risk vs. High Reward: Oil in Somalia', *Oil Investing News*, 24 July.

De Soysa, I. (2000) 'The Resource Curse: Are Civil Wars Driven by Rapacity or Paucity?' in Berdal, M. and Malone, D. M. (eds) *Greed and Grievance: Economic Agendas in Civil Wars*. Lynne Rienner: London. 113-135.

Economist (1977) 'The Dutch Disease', 26 November.

Gelb, A. (1988) *Oil Windfalls: Blessing or Curse?* Oxford University Press: Oxford.

Gibbs, D. (2000) 'Realpolitik and Humanitarian Intervention: The Case of Somalia', *International Politics*, vol 37.

Gilblom, K (2012) 'Somalia says will not cancel new oil contracts', Reuters, 12 October

Gylfason, T. (2000) 'Resources, Agriculture and Economic Growth in Economies in Transition', *Kyklos*, vol. 4.

Hartwick, J. M. (1977) 'Intergenerational Equity and the Investment of Rents from Exhaustible Resources', *American Economic Review*, vol. 67.

Heritage Institute for Policy Studies (2013) *The U.S. Recognition of Somalia: Implications and the Way Forward.* HIPS Policy Briefing Issue 1. Heritage Institute for Policy Studies: Mogadishu.

Humphreys, M., Sachs, J. D., and Stiglitz, J. E. (2007) 'What is the Problem with Natural Resource Wealth?' in Humphreys, M., Sachs, J. D., and Stiglitz, J. E. (eds) *Escaping the Resource Curse.* Columbia University Press: New York.

Humphreys, M., Sachs, J. D., and Stiglitz, J. E. (eds) (2010) *Escaping the Resource Curse.* Columbia Univeristy Press: New York.

Indian Ocean Newsletter (2012), 'Oil security in Puntland', 21 July.

Jopson, B. (2007) 'China gambles on Somalia's unseen oil', *Financial Times*, 23 July.

Karl, T. L. (1997) *The Paradox of Plenty: Oil Booms and*

*Petro-States.* University of California Press: Oakland.

Karl, T. L. (1998) 'State Building and Petro Revenues', in Garcelon, M., Walker, E. W., Patten-Wood, A., and Radovich, A. (eds) *The Geopolitics of Oil, Gas, and Ecology in the Caucasus and Caspian Sea Basin.* Berkeley Institute of Slavic, East European, and Eurasian Studies: Berkeley.

Karl, T. L. (2000) 'Crude Calculations: OPEC Lessons for the Caspian Region', in Ebel, R. and Menon, R. (eds) *Energy and Conflict in Central Asia and the Caucasus.* Rowman Littlefield: New York. 29-54.

Karl, T. L. (2005) 'Understanding the Resource Curse', Tsalik, S. and Schiffrin, A. (eds) *Covering Oil: A Reporter's Guide to Energy and Development.* Open Society Institute: New York.

Kolstad, I. and Wiig, A. (2008) *Political Economy Models of the Resource Curse: Implications for Policy and Research*, CMI Working Paper 2008:6. Christian Michelsen Institute: Bergen.

Larbi, H. (2012) 'Oil Dependence and State Building: A Comparative Analysis of Iraq and Libya', Presentation held in April 2012.

Mallory, G. (2013) 'Somaliland: Government Confirms DNO International Production Sharing Contract', *Somaliland Sun*, 23 April.

Manson, K. (2013) 'Somalia: Oil thrown on the fire', *Financial Times*, 13 May.

Marilyn S. (2004) 'The Geopolitics of Conflict and Diamonds in Sierra Leone', *Geopolitics*, vol. 9, no. 1.

NewsBank (2008) 'Somali president approves oil exploration project in Puntland',  1 May.

NewsBank (2012a) 'Federal government authorizes regional administrations to pursue oil drilling', 23 January.

NewsBank (2012b) 'Somali insurgency threatens oil drilling in north', 29 February.

Roll, M. and Sperling, S. (eds) (2011) *Fuelling the World – Failing the Region? Oil Governance and Development in Africa's Gulf of Guinea.* Friedrich-Ebert-Stiftung: Berlin.

Ross (2012) *The Oil Curse: How Petroleum Wealth Shapes the Development of Nations.* Princeton University Press: Princeton.

Sachs, J. D. and Warner, A. M. (2001) 'Natural Resources and Economic Development: The Curse of Natural Resources', *European Economic Review*, vol. 45.

Shepherd, B. (2013) *Oil in Uganda – International Lessons for Success.* Chatham House Briefing Paper. The Royal Institute of International Affairs: London.

Transparency International (2012) *Corruption Perceptions Index 2012*. URL: http://cpi.transparency.org/cpi2012; accessed 28 April 2014.

United Press International (2012a) 'Somalia's oil prospects add new dangers', 1 March.

United Press International (2012b) 'Somalia war linked to brewing oil dispute', 3 August.

Vandwelle, D. (1998) *Libya since Independence: Oil and State-Building.* Cornell University Press: Ithaca.

The Heritage Institute

For Policy Studies